

## Isbeddellada Guud ee ugu Muhiimsan

Maalgelinta deeq-bixiyeyaasha oo hooseysa iyo dagaallada iyo iskahorimaadyada socda, ayaa malaayiin Soomaali ah oo ay ku jiraan haween iyo carruur geliyey halis oo dhibaataana u keeney waxqabadyada xarumaha caafimaadka ee wareega ee Dadka Gudaha ku Barokacay, iyo kuwa digniinta hore iyo la-socoshada cudurada ugu waaweyn iyo kuwa faafa. Heerka dhibaatooyinka oo sarreeya, iyo xadka waxqabadka oo yar, ayaa micnaheedu yahay in silica Soomaalidu uu sii socon doono haddii aan la sameyn dadaallo xooggan oo lagu joojinayo rabshadda waxna looga qabanayo baahida caafimaad ee jirta. WHO iyo UNICEF ayaa in ka badan 1 milyan oo carruur shan jir ka yar ah iyo 820,000 oo haween ah ka tallaaaley cudurrada dabaysha, teetanada iyo jadeecada intii lagu jirey wejigii koowaad ee Maalmaha Caafimaadka Carruurta oo dhowaan laga fuliyey Soomaaliya. Laakiin si loo qabto wareeg labaad oo laga fuliyo qaybo kale oo dalka ka mid ah, ayaa waxaa loo baahan yahay maaliyad degdeg ah. Ilaa 2dii Oktoober, baahida maaliyadeed ee bani'aadamnimada ee wax looga qabanayo caafimaadka ayaa 24 boqolkiiba la heley.

Ugu yaraan 15 qof ayaa lagu diley in ka badan 50 kalena waa lagu dhaawacay magaalada Kismaayo ee gobolka Jubbada Hoose, 1dii Oktoobar, markii uu dagaal ka dhex dilaacay laba kooxood oo Islaamiyiin ah oo isku hayey gacan-ku-haynta magaalada. Warar gudaha ka imaanaya ayaa tilmaamaya in boqollaal qof ay ku barokaceen iskudhacyada kuwaas oo badidoodu ay aadeen Jamaame iyo Jilib oo ka tirsan Jubbada Dhexe.

Mashruuc dhinaca beeraha ah oo higsanaya in uu gaaro 78,000 oo qoys (468,000 oo qof ) oo ku nool Koonfurta/bartamaha Soomaaliya, oo ay taageerayaan Guddiga Reer Yurub iyo Ururka Cuntada iyo Beeraha (FAO) ayaa la bilaabay bishii Sebtembar. Mashruuca Taageerada Iskudhahan ee Nolol-raadsiga Miyiga (*The Integrated Support to Rural Livelihood project*) ayaa wax looga qabanayaa qiimaha cuntada ee cirka isku shareerey isaga oo looga dan leeyahay in ay Soomaalidu u dhaqaaqaan dhinaca haqab-beelka cuntada ee muddada fog. Mashruuca ayaa sii wanaajinaya wax soo saarka beeraha waxaana uu dayactirayaa kaabayaasha dhaqaalaha iyada oo loo marayo barnaamijyo shaqo lacag ku beddelesho ah.

Markab sidey 3,700 oo metric ton oo cuntada gargaarka ee WFP ah ayaa 28kii Sebtembar si ammaan ah ugu soo xirtey dekada magaalada Muqdisho isaga oo ay gelbinayaan ciidamada badda ee Midowga Yurub, maalin ka dib markii markab ay Soomaali leedahay laga soo badbaadiyey weerar ay ku qaadeen burcad-badeed isaga oo jooga meel u dhow dekada Muqdisho taas oo dhalisey dilka naaquudihii markabka. Weerarkan burcad-badeedda ee dhowaan ka dhacay meel u dhow dekada Muqdisho ayaa laga yaabaa in uu saameyn ku yeesho qiimaha maraakiibta lagu kireysto iyada oo laga yaabo in sharikadaha caymisku ay dib u qiimeeyaan halista ku imaan karta maraakiibta marta bannaanka xeebta Soomaaliya.

## Waxqabadka

WFP iyo la-hawlgalayaasheeda ayaa 622 metrik ton oo cunto ah u qaybiyey 14,700 ka-faa'iideystayaal ah taas oo hoos imanayeysey barnaamijyada quudinta hay'adaha, nafaqeynta caafimaadka hooyada iyo dhallaanka, cunto-shaqo-ku-beddeleshada, quudinta degdegga ah ee dugsiyada iyo kuwa quudinta dheeriga ah ee gobollada Sool, Sanaag, Awdal, W/Galbeed iyo Togdheer ee Somaliland. Gobolka Jubbada Hoose, ayaa ilaa 7,200 oo ka-faa'iideystayaal ah ay ku heleen cunto hoos imanaysey barnamijyada quudinta dheeriga ah taas oo ka dhacday 19 goobood oo ku baahsan degmada Af-madow. Degmooyin kala duwan oo ka kala tirsan gobollada Baay, Bakool iyo Gedo, ayaa 45,300 oo qof ay sidoo kale ku heleen cunto gargaar ah oo hoos imanaysey barnamijyada quudinta dheeriga ah. Ilaa 65 bukaan oo ku jirey cusbitaalka magaalada Garbahaarey ee gobolka Gedo ayaa heley raashinkoodii billaha ahaa oo gaarayey 2 metrik tan oo cunto ah.

Si wax looga qabto xaaladda abaareed ee ka jirta Soomaaliya, ayaa UNICEF ay bixisey afar weelal biyo-hays ah oo waaweyn oo si amaan ah loogu keydinayo biyo oo ay ka faa'iideysanayaan qiyaastii 10,000 oo Dad Gudaha Ku Barokacay ah oo ku nool degmada Baydhabo ee gobolka Baay. Hay'adda *Concern Worldwide* ayaa sidoo kale biyo-dhaamin ka bilowdey degmada Berdaale ee gobolka Baay, taas oo ay ka faa'iideysanayaan 13 tuulo, halka 3,555 qoys ay ka faa'iideysteen Biyo-dhaaminta degmada Buulo-Xaawo ee gobolka Gedo oo la sameynayey maalin kasta oo ka mid ah toddobaadka.

UNHCR iyo dallada haweenke ee WAWA ayaa caafi-dhowrka haweenka u qaybiyey ilaa 10,000 oo haween nugul ah oo ku nool degmada Boosaaso ee Puntland. Badeecaddaas ayaa dhiirigelin doonta nadaafadda, waxaana maalmaha soo socda la qorsheynayaa in dadaalkaas oo kale loogu faa'iideeyo ilaa 20,000 haween kale ah.

**La soo xiriir:** Faahfaahinta dheeriga ah ee afka Ingiriisiga, kala soo xiriir: Rita Maingi +254 734 800 120 – [maingir@un.org](mailto:maingir@un.org). Af-Soomaaliga ama Ingiriisiga, kala soo xiriir Muna Maxamed + 254 733 643 737 – [mohamed26@un.org](mailto:mohamed26@un.org)